



# PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

Telephone:

Re:

I am writing to let you know that I had to suspend your student. I know that it is a very serious matter for families to learn that their student may be involved in any kind of misconduct. We take your student's welfare very seriously.

The incident occurred on

The behavior(s) that led to the suspension are:

The out of school suspension will begin on \_\_\_\_\_ and continue

During the period of suspension, your student may not attend this school, participate in school activities, or enter any other Portland Public School property without the permission of the Principal. Your student is encouraged to ask me for assignments during the suspension.

A conference is needed before your student returns to school. This allows us to review your student's behavior and academic progress and together make a plan to promote your student's success in school.

I have scheduled our meeting for

Please check in at the school office. Office staff will direct you to the meeting. If you are unable to meet at this time, please call me immediately at 503.916. \_\_\_\_\_ to reschedule the meeting. Please understand that your student may not return to school until you and I have met.

Attached are suspension procedures. If you are unable to read or understand them, please call 503.916.3427 to have someone explain it to you in a language you understand.

Again, the school takes any removal from class time seriously. When students are not in class their educational progress is limited. It is my hope that this process provides a learning opportunity for your student. If you have any questions, concerns or need additional information, please feel free to call me at 503.916.

Sincerely,

Attachment: Suspension Procedures

c: Student's School File, Student Services (FAX: 503.916.2244)



# DUGSIYADA DADWEYNAHA PORTLAND

Telefon:

Tx:

Waan ogahay in ay tahay arrin aad ugu culus qoysaska in ay ogaadaan in ardaygoodu ku jiray wax anshax xumo ah. Waxaanu si culus u qadarinaa ardaygaaga daryeelkiisa.  
Dhacdadani waxay dhacday Dhaqanka keenay joojintu waa:

Dibed ka joogista dugsigu waxay bilaabanaysaa

oo ay soconaysaa ilaa

Muddada joojinta, ardaygaagu ma tegi karo dugsiga, kamana qayb-qaadan karo dhaqdhaqaaqyada dugsiga, ama ma geli karo meel uu leeyahay Dugsiga Dadweynaha Portland haddii aanad ruqsad ka haysan Maamulaha. Aradyagaaga waxa lagu dhiirigelianayaa inuu i weydiisto hawsha dugsiga inta uu ku jiro ka joojinta.

Fadhi ayaa loo baahan yahay kahor intaanu ardaygu dugsiga ku noqon. Tani waxay noo saamaxaysaa in aanu dib u fiirino ardaygaaga anshaxiisa iyo horumarkiisa waxbarasho oo wadajir loo sameeyo qorshe lagu kobcinayo guusha ardayga ee dugsiga.

Waxaan kulankeena inoo qabtay

Fadlan tag xafiiska dugsiga. Shaqaalaha dugsiga ayaa kuu tilmaami doona meesha kulanka. Haddii aad awoodi weydo inaad kulanka timaado saacadaas, fadlan isla-markiiba iga soo wac 503.916. si aan mar kale u qabsano ballanka. Fadlan waxaad fahamtaa in aanu ardaygaagu ku soo noqonayn dugsiga ilaa adiga iyo aniga aan kulano.

Halkan waxa ku lifaaqan nidaamyada joojinta. Haddii aad awoodi weydo in aad akhrido ama fahamto, fadlan wac 503.916.3427 si aad u hesho qof kuugu sharxa luqadda aad fahamto.

Mar kale, dugsigu wuxu si culus u arkaa waqtiga ka-maqnaashaha fasalka. Marka ardaydu aanay fasalka joogin horumarkooda waxbarasho waa xadidan tahay. Waxay rajadaydu tahay in ay hawshan socotaa u noqoto fursad uu wax ku barato ardaygaagu. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, welwel ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraada, fadlan si xora iiga soo wac 503.916.

Si daacadnimo leh,

Lifaaqa: Nidaamyada Joojinta  
c: Faylka Ardayga ee Dugsiga, Student Services

|     | <b>English</b>                             | <b>Somali</b>                   |
|-----|--|---------------------------------|
| 207 | Abusive Profane Language                   | Af Xumo Xadguduba               |
| 312 | Arson                                      | Kas-u-gubid                     |
| 511 | Assault                                    | Weerar                          |
| 310 | Attempted Arson                            | Isku-dayid Kas-u-gubid          |
| 516 | Battery                                    | Garaacis                        |
| 309 | Bomb Threat                                | Hanjabaad Bambo (Bam)           |
| 311 | Burglary                                   | Guri-jabsi                      |
| 501 | Bullying/Harassment/Hazing                 | Foorjo/Waxyelayn/Tashwiish      |
| 104 | Class Cutting                              | Goysmada Casharka               |
| 301 | Deliberate Misuse of Property              | Si-xun U-isticmaalid Hanti      |
| 513 | Display of Patently Offensive Material     | Muujiin Wax Gef Ah              |
| 202 | Disruptive Conduct                         | Anshax Gurraacan                |
| 508 | Extortion                                  | Baad                            |
| 308 | False Fire Alarm                           | Digniin Dab Beena               |
| 504 | Fighting                                   | Dirir                           |
| 209 | Forgery                                    | Been-abuur                      |
| 303 | Gambling                                   | Khamaar                         |
| 210 | Gang Member Identifier                     | Tilmaamid Xub Budhcad           |
| 201 | Inappropriate Dress                        | Dhar Aan Haboonayn              |
| 203 | Indecent Gesture/Exposure                  | Calaamad/Ismuujin Anshax Xun    |
| 204 | Insubordination                            | Amar-diidis                     |
| 208 | Interference with School Personnel         | Farogelin Shaqaalaha Dugsiga    |
| 503 | Intimidation                               | Yasid                           |
| 102 | Loitering                                  | Warwareeg                       |
| 307 | Major Theft                                | Tuugo Weyn                      |
| 306 | Major Vandalism                            | Kharribaad Weyn                 |
| 304 | Minor Theft                                | Tuugo Yar                       |
| 302 | Minor Vandalism                            | Kharribaad Yar                  |
| 103 | Off Limits                                 | Xad Dhaaf                       |
| 205 | Open Defiance                              | Diidmo-cad                      |
| 600 | Plagiarism/Cheating                        | Qishid?Khayaano                 |
| 507 | Possession of a Weapon                     | Haysasho Hub                    |
| 305 | Possession of Stolen Property              | Haysasho Alaab La Xaday         |
| 505 | Possession/Use of Fire Crackers/Explosives | Haysasho/Adeegsi Rash/Wax Qarxa |
| 401 | Possession/Use of Tobacco                  | Haysasho/Isticmaal Tubaako      |
| 514 | Reckless Vehicle Use                       | U-adeegsi Baabuur Si-xun        |
| 510 | Robbery                                    | Dhac                            |
| 502 | Sexual Harassment                          | Dhibaatayn Galmo La-xiriirta    |
| 101 | Tardiness                                  | Daahitaan                       |
| 515 | Threat of Violence                         | Hanjabaad Xoog                  |
| 509 | Threat with a Weapon/Dangerous Instrument  | Hanjabaad Hub Wata/Shay Halisa  |
| 106 | Trespassing                                | Gelid Sharci Darro              |
| 105 | Truancy                                    | Goysmo Dugsi                    |
| 512 | Use of a Weapon                            | Adeegsi Hub                     |
| 206 | Willful Disobedience                       | Dhago-adayg Ulakasa             |

## DARIIQADDA ERYIDDA

Arimaha soo socdaa waxa ay qaadaa dhigayaan dariiqadda eryidda ee Dugsiyadda Guud ee Portland, waxaa laga soo xigtay Fulinta Hab-maamulka Dugsiyadda Degmadda ee Dariiqadda Xayiraadda iyo Eryidda. Si aad u aragto Fulinta Hab-maamulka booqo shabakadda caalamiga ah iyo xidhiidhka xagga hoose ku lingaxan.

[http://www.pps.k12.or.us/files/board/4.30.021\\_ADSuspensionExpulsionFinal\\_4.9.10.pdf](http://www.pps.k12.or.us/files/board/4.30.021_ADSuspensionExpulsionFinal_4.9.10.pdf)

Goor walba oo waalidka loo diro qoraal si uu oga soo qayb galo dhagaysiga ashtako eryidda, nuqul ku hagaya Nidaamka, Sharciyadda iyo Dariiqadda loo qaaday iyo mas'uuliyadda adayga, xuquuqda, iyo anshaxa, ama nuqul qaybta eryidda oo ka mid ah hagaha ayaa lagu soo caliqi doonaa. Eryid ka dhan ah ardayda luqadoodu xadidantahay, ama arday ay waalidkii/hagihisu haysato dhibaato xagga luqadda ah waxay codsan karaan tarjubaan.

### **Qeexida iyo Waxa ka dhalan kara Eryidda**

Eryidu waxay ka reebaysaa ardayga dhigashadda ama xaadiridda howlaha dugsiga illaa iyo sanad dugsiiyeed.

- Hadii ardayga la eryo xataa dhamaadka xiliga dugsiga, ardayga waxaa dhici karta in uu waayo saacadaha xiligaa ay eryidu saamaysay.
- Ardayda loo eryo sababta heerka C ee Xadgudubka daroogadda waxaa laga doonayaa in uu isdaweeyo inta uu ku jiro xiliga eryidda.
- Maamulaha dugsiga ama loo xilsaaraha xiliga wadahadalka loogu ogolaanayo ardayga in uu dib ugu soo laabto dugsiga, waxa uu egi doonaa horumarka ardaygu ka sameeyey dawaynta(hadii ay haboontahay) isagii oo soo bandhigaya heerka uu ardaygu ka gaadhay waxbarashadda iyo saacadaha uu helay intii uu dhiganayay dugsiga badiilka ah.

### **Aragtida Guud ee Nidaamka Eryidda**

Sida guud goorta ardayda laga xayiro dugsiga ama uu ku xadgudbo nidaamka degmadda kan oo mudan in loogaga eryo dugsiga, talaabooyinka soo socda ayaa la qaadayaa:

- Waxaa dib loo dhigayaa dhagaysiga Eeryidda (eeg Nidaamka Xayiraadda ee Hagahan).
- Wargelinta dhagaysiga ayaa loo diray aqalka ardayga.
- Dhagaysiga eryidda ayaa la qabanaya (sida guud, toban cisho gudahood)
- Go'aankii oo la gaadhay iyadii oo aqalkana loo diray go'aanka la gaadhay.

Ogoow: [ORS 339.115\(4\)](#) waxay ogolaanaysaa aqoonsiga eryidda ee dugsiyadda degmooyinka kale iyadii oo aan la qaban wax dhagaysi ah.

### **Dib-u-eegidda Xayiraadda Dhagaysiga Eryidda**

Toban cisho(10) oo xidhiidh ah kadib ee xayiraadda dhagaysiga eryidda, ardayga waa in loo ogolaadaa dugsiga illaa iyo dhagaysiga eryidda hadii uusan;

- go'aan ka gaadhin maamulaha ama ruuxa loo xilsaaray, in hadii uu ardaygu ku laabto dugsiga uu dhibaato ugaysan karo badbaadada dadka kale ama barnaamijyadda baxa dugsiga; ama
- dhagaysigii eryidda la qabtay go'aan lagu gaadhay in ardayga laga eryo dugsiga; ama
- dhagaysiga eryidda dig loo dhigay heshii laga gaadhay waalidka/hagaha; ama
- Sababta ardayga oo qaba xanuun xagga jidhka ama maskaxda ah ama ardaygii oo la xidhay, ama sababo kuwaa la coon ah.

Maqnaanshaha mid un ka mid ah xaaladahaa laga reebay eek or ku xusan, ardayga lagama reebi karo imaanshaha dugsiga in ka badan toban(10) cisho oo xidhiidh ah.

### **Bilowga Nidaamka Eryidda**

1. Marka cadayntu ka timaado kulankii xanibaadda ee aan tooska ahayn iyo/ama baadhitaanka lagu ogaado suurtaglnimadda eryidda, maamulaha ama ruuxa loo xilsaaray arintan waa in la wargeliyaa. Eryidda waxaa biixn kara oo keliya maamulaha ama ruuxa loo xilsaaray.
2. Nidaamka eryidda waxaa si rasmi ah u bixin akra maamulaha ama ruuxa loo xilsaaray, isaga oo udiraya warqad uu ku wargelinayo dhagaysiga eryidda ee xigga.

### **Wargelinta Dhagaysiga Eryidda**

1. Marka lagu talaabsanayo nidaamka eryidda, maamulaha ama ruuxa loo xilsaaray waa in ay waa in ay u diraan waalidka iyo wargelin iyadda oo la adeegsanayo boostaalaha gacan ka dhiibka ah ama kan caadiga ah iyadii oo lagu qoray luqadda ay fahmi karaan.
2. Warqadda wargelinta waa in ay ku cadyihiin hmacluumaadka soo socda.
  - a. Maxsuulka gaadhka ah ee la gaadhay iyadda sharciyadda taageeraya.
  - b. Arin cad oo muujinaysa marqaatiga taageeraya maxsuulka, tan ay suuragal tahay ka eryidda dugsiga.
  - c. Waqtiga, taariikhda iyo goobta dhagaysiga si loogu tixgeliyo arimaha fadhigaa ee suuragalnimadda eryidda. dhagaysigu waa in uusan dhaafin shan cisho (5) oo maalmaha dugsiga ah marka laga bilaabo maalinta loo dhiibay boostaalaha, hadii aan waalidka/haguha lagu wargelin shakhsiyani ama khadka telephone-ka dhagaysi waqti hore ah oo la siiyey (2) cisho oo wargelin ah. Waalidka/Hagaha waxay codsan karaan waqti siyaadda ah marka loo eego kan ay bixiyeen maamulaha ama ruuxa loo idamaday. Ardaygu looma diidi karo dugsiga in ka badan (10) maalmood oo xidhiidh ah, hadii aan fadhiga dhagaysiga la qaban oo aan go'aan lagu gaahin in ardayga laga eryo dugsiga. Ama aan dhagaysiga dib loo dhigin heshiis dhex maray waalidka/hagaha iyo dugsiga sababta xanuun xaga maskaxda ama jirka ah awgii ama ardaygii oo xidhan iyo sababo la mid ah.
  - d. Xusuusinta in xuquuqda waalidka/hagaha iyo ardayda lagu dhigay Guide to Policies, Rules and Procedures on Student Responsibilities, Rights and Discipline iyo in nuuq ka mid ah warqadan lagu xidho qoraalka loo dirayo waalidka
  - e. Cadaynta in la heli karo barnaamijyo waxbarasho oo badiil ah iyo tacliimaad.

### **Codsiga Hakinta Dhagaysiga ee Waalidka/Hagaha**

Hadii aysan suuragal ahayn in waalidka/haguha ay yimaadaan kulanka dhagaysiga waqtiga lagu dhigay warqadda, waalidka/hagaha waxay wici karaan maamulaha ama ruuxa loo idmaday in loo qabto waqti badiil ah. Hadii ay qasab noqoto in dib loo dhigo, dhagaysiga waa in lagu qabtaa todobo(7) cisho gudahood.

### **Waxyaabaha Tixgelinta Mudan Dhagaysiga Eryidda ka hor.**

1. **Adeegsiga Tarjubaan**

Tarjubaanka waa in lagu daraa marka uusan ardayga ama waalidka/Haguha aysan fahmaynin luqadda Ingiriisida.
2. **Eryidda Dhagaysi La'aan**

Ardayna lama eryi karo dhagayso la'aan. Hadii wargelin ku haboon ee goobta iyo waqtiga dhagaysiga loo qabtay.

  - a. waalidka iyo hagaha midna ama wax matala ardaygaa oo aan goobta iman; ama
  - b. ardayga oo 18 jir ama ka wayn ama ubad ka xoroobay waalidkii, ama matalihii ardaygaa oo aan soo muuqan; ama
  - c. Waalidka/hagaha, ama ardayga, hadii uu 18 jir iyo ka wayn yahay ama uu ka xoroobay waalidkii oo uu qoraal kaga tanaasulo xuquuqda dhagaysiga, kadib dhagaysiga waa la qabanayaa si loosoo bandhigo xaaladdaa, go'aankana waxaa lagu salaynayaa xaqiiqadda halkaa kasoo baxda; diiwaanka ayaa qabanaya dhagaysiga xog uruurinta iyo go'aanka; ardayga iyo waalidka/hagaha waxaa la gaadhsiin doonaa wargelinta go'aanka iyo waxbarashadda badiilka ah ee ku haboon.
3. **Awooda Eryidda.**

Awooda eryidda waxaa lagu matalaya Madaxa dugsiyadda tan iyo howlwadeenka dhagaysiga ee aan isagu ahayn baadhaha xogta ee aasaasiga ah. Maamulaha ayaa sida guud matala howlwadeenka dhagaysiga; siday noqotaba, xaalado waxaa jira ruuxa loo idmaday loo baahanyahay.
4. **Matalidda**
  - a. Waalidka/hagaha iyo ardayga waxaa usoo raaci dhagaysiga qolo sadexaad ama lataliye sharci, hadii ay doortaan.
  - b. Waalidka/Hagaha iyo ardayga waa in ay soo wargeliyaan maamulaha (2)laba maalmood ka hor dhagaysiga, hadiiba ay jidho cid usoo raacaysa dhagaysiga.
  - c. If no prior notice is given to the principal or designee, and counsel or witnesses are brought, the principal or designee may, if reasonably necessary, postpone the hearing for two (2) days.

Hadii aan wax wargelin ah la siin Maamulaha ama ruuxa loo idmaday, iyadii oo la taliye ama marqaato la keenay, hadii sabab macquul ah loogu baahdo maamulaha (2) laba maalmood ayuu dib udhigayaa dhagaysiga.

**5. Marqaatiga iyo Wax Waydiinta Marqaatiga.**

- a. **Ardaygii oo Marqaati ah** - Hadii macluumaad ka yimi arday marqaati ahaan loosoo bandhigo xiliga dhagaysiga, aqoonsiga ardaygaa lama shaacin doono xukunka howlwadeenka hadii ay saamaynayso khibrada ardayga ee dugsiga. hadii aan aqoonsiga ardayga la shaacin, howlwadeenka dhagaysiga waxa uu si taxadar leh oo toos ah uwaraysanayaa marqaatiga, isagii oo adeegsanaya sida qaadi si loo xaqiijiyo macluumaadkaa, sidoo kale waxa uu waydiinayaa su'aalaha ay waalidka/hagaha/matalaha ardayga la ashtakeeyey ay doonayaan.

**6. Helida Macluumaadka iyo Diiwaanadda**

- a. Waalidka/Hagaha iyo/ama Lataliyaha xagga sharciga waxay waydiinsan karaan maamulaha ama ruuxa loo idmaday macluumaadka la xidhiidha dhacdada/habdhaqanka ashtakadda ka hor xiliga dhagaysiga, iyadii oo aan laga talaabsanaynin xuduuda udhigan Nidaamka Gudiga ee Diiwaanadda.
- b. Xiliga dhagaysiga, ruuxa loo xilsaaray waxa uu cuskan karaa Diiwaanka Dugsiga iyo Degmadda. Sida diiwaanadda la heli karo si loo baadho ee loogu tagalay baadhida ee ardayga iyo/ama isaga/iyadda matalaheeda ka hor xiliga dhagaysiga iyadii oo aan laga talaabsanaynin xuduuda udhigan Nidaamka Gudiga ee Diiwaanadda.

**7. Ka Baaqsiga Kasoo Qaybgalka Dhagaysiga**

Dadaal macquul ah waa in lagu bixiyaa sidii loo suuragelin lahaa in waalidka/hagaha iyo marka ay haboontahay ardayguba ay soo xadiraan dhagaysiga. Hadii ay waalidka/hagaha/ardaygu ku guuldaraystaan kasoo qaybgalka dhagaysiga, howlwadeenka dhagaysiga waa in uu dib dhigaa dhagaysiga qoraa go'aanka, islamarkaana udiraa nuqul waalidka/hagaha iyo ardayga.

**8. Xaaladda Diiwaangelinta ee Ardayga Xiliga Dhagaysiga**

Ardaygu qasab ma ahan in uu isudiiwaangeliyo xiliga dhagaysiga. Hadii ardaygu uu ka tagay ka hor xiliga dhagaysiga hadana la eedeeyey islamarkaana uu haysto ka hor xiliga ka tegida, dhagaysigu waa qasab in la qabto.

***Dhagaysiga***

Taxanaha soo socda waxaa waxyaabaha ugu yare ee la doonayo dhagaysiga eryidda:

1. Howlwadeenka dhagaysiga waa in uu ogolaada qaybaha in ay si cad u sharxaan arimahooda khusuusiga ah iyagii oo soo gudbinaya wixii macluumaad ah ee la xidhiidha taa.
2. Waalidka/Hagaha iyo ardayga waa in ay ka sheekaystaan anshaxa iyagii oo soo gudbinaya macluumaadka iyo marqaatiyadda sida dhow ugu xidhan mowoduuca eryidda.
3. Waalidka/Hagaha iyo ardayga waxay si toos ah ama iyagii oo adeegsanaya la taliyaha waydiin karaan su'aalo marqaati walba oo la keeno
4. Inta lagu jiro dhagaysiga, howlwadeenka dhagaysiga waxa uu u oogolaan doonaa xog baadhayaasha iyo shaqaalaha dugsiga in ay soo gudbiyaan macluumaadka la xidhiidha si loo muujiyo. Tani waa in aysan iska hortaagin howlwadeenka dhagaysiga in uu soo gubiyo macluumaadka la xidhiidha arintan ee isaga/iyaddu leedahay goorta la doonayo isfaham dhamaystiran oo ku jeeda arintan marka loo baahdo.
5. Qawaaniin mutaxan ee marqaatiga waa in aan lagu dabaqin howlahan. Siday noqotaba, tani waa in aysan xadidin awooda maamul ee howlwadeenka dhagaysiga.
6. Howlwadeenka dhagaysiga waxa uu cuskan karaa diiwaanadda dugsiga iyo degmadda iyo macluumaadka lasoo badhigo xiliga dhagaysiga.
7. Howlwadeenka dhagaysiga waa in uu sameeyaa dhagaysiga diiwaan laga daawan (sida cajalad la duubo, CD iwm) iyo ardayga

***Dhagaysiga Kadib iyo Nidaamka Eryidda***

1. Xadiida Xaqiiqadda iyo Talaabadda Anshax ee Ku haboon
  - a. Dhagaysiga kadib, Howlwadeenka dhagaysigu waa in uu eegaa dhamaan macluumaadka isagii oo go'aan ka gaadhis ku samaynaya wixii oga muuqday xaqaa'iqdaa
  - b. Howlwadeenka dhagaysigu waa in uu cadeeyaa hadii macluumaadka ay taageerayaan go'aanka la gaadhay
  - c. Howlwadeenka dhagaysigu waa in uu cadeeyaa in la eryayo ardayga iyo in kale.

2. Wargelinta Waalidka/Hagaha Go'aankii Dhagyasiga
  - a. Go'aanka Howlwadeenka dhagaysigu waxaa laga wada xidhiidhay dhagaysigii ama telephone-ka kadib isla maalinta dhagaysiga ama maalmaha xiga iyo (3) sadex maalmood gudahood xiliga dhagaysiga kadib waa in uu Howlwadeenka dhagaysigu u diraa waalidka/hagaha. Isagii oo adeegsanaya boostadda gacan ka dhiib ah ama tan caadiga ah, wargelin go'aanka la gaadhay oo ku dhigan luqad ay waalidka iyo ardayguba fahmi karaan.
  - b. Hadii go'aanku yahay in la eryo, qoraalki waa in uu sheegaa:
    - in eryidu ay bilaabanayso maalin cayiman;
    - mudada eryidda;
    - Sabata dhabta ah ee eryidda;
    - In ay waalidka/hagaha iyo ardayguba codsan karaan in xigaha Madaxa Dugsiyadu dib u eegid ku samayn karo eryidda, codsiga noocaas ah waa in uu ku yimaadaa dariiqadda qoraalka ama telephon-ka oo ku jeeda Xigaha Madaxa Dugsiyadda shan (5) cisho gudahood, laga bilaabo marka uu gaadho go'aanka eryidda;
    - In ardaygu leeyahay xuquuqda kusoo noqoshadda dugsiga kadib marka ay dhamaato mudada eryidda, sii wadashadda dhigashadda noocaas ah waxa suuragal in lala yimaado heerka la doonayo dugsiga ardayda oo dhan;
    - wargelinta in la heli karo tacliimaadka badiil waxbarasho oo gaadh ah.
3. Ugudbinta Go'aankii Dhagaysiga Xigaha Madaxa Dugsiyadda. Howlwadeenka dhagaysigu waxa uu ugudbinayaa macluumaadka la xidhiidha arintaa oo dhan Xigaha Madaxa Dugsiyadda, marka lagu daro go'aanka Howlwadeenka iyo wixii xaqiiqa ah ee uu soo ogaaday.

### **Ardayda La Eryo**

Ardayda la eryo ma dhigan doonaan dugsi kale oo degmadu leedahay inta ay ku jiraan eryintaa, marka laga reebo barnaamijyadda ka hortag la ansixiyey ee rabshadda, dabciga ama barnaamijka alkoladda iyo daroogadda sida lagu uu ku talo bixiyey Madaxa Dugsiyadda ama howlwadeenka loo idmaday.

Ardayda laga eryay dugsiyadda dibadda ka ah degmadda looma ogolaan doono in ay dhigtaan dugsiyadda degmadda inta ka hadhay waqtigii eryidda xataa hadii uu ka mid noqdo deganayaasha degmadda.

### **Barnaamijyadda Waxbarasho ee Badiilka ah**

Waxbarashadda badiilka ah ama tacliimaad ku baxa aqalka waa la siin doonaa iyadii oo la raacayo sida uu sharcigu la doonayo ardayda la eryey islamarkaana noqday deganayaashaa degmadda inta uu ku jira xaaladaa eryidda.

### **Saacado Dhumay.**

Marka ay daruuri noqoto in ardayga laga eryo dugsiga xataa hadii ay noqoto dhamaadka xili dugsiyeedka, wuu dhumay karaa saacadaha hadii uusan soo dhamaystirin shaqadii ku haboonayd ee laga doonayay dugsiga badiilka ah. Inta lagu jiro shirka xaalad walba oo dib ugu ogolaasho, eegida maamulaha ama howlwadeenka loo idmaday heerka akadeemiyadeed ee ardayga ayaa lagu qeexi doonaa in saacadaha qaar loo ogolaan doono sababta shaqadii uu qabtay intii uu ku jiray eryidda

### **Dib-ugu-ogolaasho**

Ardayda bedelka ah ee laga eryey dugsiga waxay xaq uleeyihiin in ay dib ugu laabtaan dugsiga bedelka marka uu waqtiga eryidu dhamaado, islamarkaana shuruudihii eryidda laga soo baxo.

### **1. Dib-oga-soo-noqoshadda Eryidda.**

Marka laga reebo kuwa sababta daroogadda loo eryey, ardayda waa in loo ogolaadaa dugsiga kadib marka ay soo dhamaystaan waqtigii eryidda. Waqtiga dib-ugu-ogolaashaha ardayga soo noqonaya iyo waalidka/hagaha waa in ay la kulmaan maamulka islamarkaana ay isla meel dhigaan qorshe lagu taageerayo ardayga islamarkaana lagaga badbaadinayo dugsiga dabcigii goortii hore ay ka dhalatay eryidda iyadii oo la meelmarinayo najaxa ardayga. Goorta ardayda loo ogolaado dugsiga, dhamaan dadaal kasta oo macquul ah waa lagu talaabsan doonaa si loo caawiyo qorshaha ardayga oo meel mara iyo sidii ay udhamaysan lahaayeen barnaamijyadooda waxbarashadooda.

## 2. **Dib-ugu-ogolaashadda Heerka 6aad ee Eryidda**

Ardayda laga eryo dugsiga waxaa dib loogu ogolaan doonaa dhamaadka sanadka eryidda iyagii oo soo dhamaystay barnaamij waxbarasho ee la ansixiyey ee ka hortaga rabshadaha. Barnaamijkaa waxa uu siinayaa dugsiga macluumaadka la xidhiidha horumarka ardayga.

Ardayga iyo waalidka/hagaha waxay la kulmayaan maamulaha ama howlwadeenka loo idmay si ay uqorsheeyaan dadaalka ay ku bixin doonaan qolo walba ardayga sidii uu dhamaysan lahaa barnaamijyada waxbarasho islamarkaana loogu meelayn lahaa halka ku haboon dib-ugu-ogolaashadda kadib.

## 3 **Dib-ugu-ugolaashaha Heerka A ee Amardiidada iyo Heerka B ee Eryidda**

Ardayga la eryey waa in dugsiga dib-loogu-ogolaadaa hadii kuwa soo socda uu kasoo baxo:

- Qiimaynta aalkoladda iyo daroogadda(kharashka Degmadda)
- Taladii lasoo jeediyey ee qiimaynta la raacay(Aan ahayn kharashka Degmadda)

## 4. **Dib-ugu-ogolaashaha Heerka C**

Ardayga la eryey waa in dugsiga dib-loogu-ogolaadaa hadii kuwa soo socda uu kasoo baxo:

- In uu soo dhamaysto barnaamij dhaqan celin oo degmadu aqoonsantahay marka lagu daro taxliilka kaadida(aan ahayn kharashka Degmadda)
- Barnaamijkuna uu usoo gudbiyo dugsiga macluumaadka la xidhiidha horumarka ardaygu sameeyey iyo taxliilkii kaadida.
- Xaaldaaha oo dhan, ardayga soo noqonaya iyo waalidka.hagaha waa in ay la kulmaan maamulaha iyo in ogolaaday qorsho lagaga badbaadinayo ardayga iyo dugsiga falal kale oo la xidhiidha daroogadda. Hadii aan lasoo dhamaystirin shuruudaha ardaygu waxa uu weli sii joogi doonaa dugsiyada badiilka ah

## **Laga Cafiyo Xaadiridda Dugsiga**

Xaaladaha qaar, waxaa dhici karta in ay waalidka/hagaha idman soo jiidato in ay codsadaan in ardayga laga cafiyo xaadiridda dugsiga intii uu kusoo laaban lahaa goorta ay eryiddu dhamaato. Ka eeg “Xaadiridda” qoraalkan iyo dhuruudaha iyo nidaamka si aad oga dhaafto ardayga xaadiridda dugsiga.

## **Nidaamka Rafcaanka**

Ardayda iyo/ama waalidiinka/hagaha waxay codsan karaan rafcaan ku jeeda eryid walba ama dib-dhiga go'aanka eryidda. Maamulaha oo keliya ayaa wax ka bedeli kara ama si kale uqori kara eryidda daruuriga, hubka ama ku xadgudubka howlwadeen.

### 1. **Xigaha Heerka Dib-u-eegida ee Madaxa Dugsiyadda**

**Codsiga Rafcaanka:** Shan (5) cisho oo maalmaha shaqadda ah gudahood oo ay kaasoo gaadho maamulaha ama howlwadeenka loo asteeyey warqad eryidd, waalidka/hagaha iyo ardayguba waxay telephone ama qoraal ku codsan karaan in Xigaha Madaxa Dugsiyadda Degmadda uu dib-u-eego go'aankii howlwadeenka dhagaysiga.

**Nidaamka Dhagaysiga ka hor:** Qofka uu ku socdo rafcaanku waa in uu dib-u-eegaa diwaanka islamarkaana uu wargeliyaa qoyska maalinta loo qabtay dhagaysiga rafcaanka islamarkaana uu matalaa howlwadeenka dhagaysiga rafcaanka.

**Dhagaysiga:** Howlwadeenka dhagaysiga waa in uu ogolaadaa qoyska in ay si cad u sharxaan aragtiddo isla markaana ay soo gudbiyaan wixii cadayn cusub ah ee la xidhiidha qadiyadan.

**Go'aan Gaadhidda:** Laba cisho oo kuwa shaqadda ah, howlwadeenka dhagaysiga waa in uu/ay ka gaadhaa go'aan ku salaysan halka ay ubataan cadaymaha lasoo bandhigay isaga oo dooran kara in uu taageero, wax ka bedelo, dib loosoo celiyo qadiyada, ama uu si kale udhigo go'aanka eryidda. Hadii go'aan lagu gaadho in ay daruuri tahay eryidda 365 maalmood, go'aanka howlwadeenka dhagaysiga waxaa loo gudbinayaa isagii oo talo soo jeedin ah Madaxa Dugsiyadda Degmadda, oo isagu leh awooda keliya ee samayn karta cadilidda.

**Wargelinta Go'aanka:** Xigaha Madaxa Dugsiyadda Degmadda ayaa go'aankiisa/keeda gaadhaya laba maalmood oo kuwa shaqadda ah gudahood isla markaana ku wargelinaya waalidka/hagaha iyo ardayga go'aankaa isagii oo qoraal ah. Wargelintu waxaa in ay cadaysaa in qoysku ay rafcaan u qaadan karaan gudiga iyadii oo qoraal ama telephone-ka ah kuwan hagaajinaya Xafiiska Madaxa Dugsiyadda Degmadda shan (5) cisho gudahood.



## 2. Heerka Dib-u-eegida Gudiga.

**Codsiga Rafcaanka.** Waalidka/hagaha waxay codsan karaan rafcaan ku jeeda eryidda kan oo ay ugudbinayaan Gudiga Waxbarashadda iyaga oo codasanaya dib-u-eegid qaab qoraal ama telephone lagu hagaajinayo xafiiska Madaxa Dugsiyadda Degmadda shan (5) cisho gudahoood laga bilaabo maalinta ay warqadda wargelintu soo gaadho.

**Go'aan Gaadhid:** Madaxa Dugsiyadda Degmada ama howlwadeenka loo idmaday ayaa eegaya diiwaanka, la kulmaya oo diyaarinaya warbixin kooban oo talo soo jeedin ah oo ku jeeda gudiga. Hadii rafcaanku uu codsaday cadillidda eryidda daruuriga ah ee 365 cisho, Madaxa Dugsiyadda Degmadda ayaa leh awooda keliya oo ku talaabsan karaa go'aan noocaas ah, isagaana kama dambays ah.

**Codka Gudiga:** Gudigu waa in uu u codeeyaa kulanka xiga ee joogtadda ah ee uu Gudigu yeelan doono iyagga oo raaca taladda iyo warbixinta kooban ee Madaxa Dugsiyadda Degmadda. Gudigu waa ay taageeri karaan, cadili karaan, ama wax ka bedeli karaan go'aankii howlwadeenka dhagaysiga.

**Wargelinta Go'aanka:** Xafiiska Madaxa Dugsiyadda Degmada ama howlwadeenka loo xilsaaray waxa uu ku wargelinayaa qoyska ardayga go'aanka gudiga ama go'aanka Madaxa Dugsiyadda Degmada si loo siiyo ama loogu diido cadillidda eryidda daruuriga ah ee 365ka maalmood

## 3. Ka hor Rafcaanka Cadillidda Eryidda

**Codsiga Cadillidda:** Marka waqtigii rafcaanka la dhafo, qolyaha danaynaya, marka lagu daro qoyska ardayga, dugsiga, howlwadeenka degmadda, ama barnaamijyadda bulshadda waxay waydiisan karaan inta lagu jiro eryidda cadillidda qodobadda eryidda (sida mudada). Codsiga waa in lagu sal-xidhaa xaalado sababaysan waana in aan lagu darin codsi wax ka bedelid ku jeeda go'aankii asalka ahaa ee laga gaadhay eryidda ardayga.

**Nidaamka.** Qolyaha danaynaya waxay soo gudbinayaan codsi qoraal ah oo ku jeeda Madaxa Dugsiyadda Degmada kan oo ay qayb ahaan ku sheegayaan sababta codsiga wax ka bedelidda iyadii oo ay kusoo lifaaqayaan wixii waraaqo ah ee caawinaya doodaa.

**Go'aan Gaadhidda:** Madaxa Dugsiyadda Degmada ama Howlwadeenka loo idmaday waxa ay tixgelinayaan diwaankii hore ee eryidda, codsiga lasoo qoray, iyo wixii macluumaad siyaadda ah iyaga oo kala tashanaya dugsiga samaynta cadillidda go'aanka.

**Wargelinta Go'aanka:** Madaxa Dugsiyadda Degmada ama howlwadeenka loo idmaday waxa ay ku wargelinayaan qoyska go'aanka la gaadhay Madaxa Dugsiyadda Degmada waa kama dambays mana banaana in rafcaan dambe laga qaato Raadraac: [4.30.021-AD](#)

## DIB-DHIGA ERYIDDA

Dib-dhiga eryidda waa ikhtiyaar anshax oo ay heli karaan ardayda ku talaabsaday falal heerka 4 ee anshaxumidda eryidda mudan, ee xukunka maamulka, ayaa ka faa'iidayaan kara kuwa badiilka ah sida District's Delayed Expulsion School Counseling Center (DESCC), duwid ama qorshe kale, kan oo uu aqoonsanyahay Madaxa Dugsiyadda Degmada, si loo dib-dhigo eryidda. Hadii go'aanka ka yimi howlwadeenka dhagaysiga uu yahay dib-dhiga eryidda halka dugsigana lagu wargeliyey in ardaygaa uusan u hogaansamin shuruudihii adeeg ee lagu xidhay, eryidu way hirgalaysaa. [Dib-dhiga eryidda uma ahan ikhtiyaar talaabadda anshax ee heerka 5 ama 6](#)

Howlwadeenka dhagaysiga waxa uu adeegsanayaa talaabooyinka soo socda:

- Maamulku waxa uu qabanayaa dhagaysiga eryidda si loo cadeeyo hadii ay jirto sabab lagu eryo ardayga iyadii oo loo qabanayo **bilowga iyo dhamaadka eryidda islamarkaana loogu sheegayo qoraal**. Maamulku waxa uu ku war gelin doonaa ardayga iyo qoyska in eryidii la dib dhigay si loo siiyo fursad ay ku dhamaystiraan badiilka, iyadii oo hadii uu ardaygu ku najaxo badiilka la siiyey, eryidi aysan jiri doonin. Maamulku waxa uu dirayaa warqad ku jeeda waalidka/hagaha oo la xidhiidha maxsuulkii dhagaysiga eryidda - dib-dhiga eryidda.
- Howlwadeenka dhagaysiga waxa uu uduwayaa ardayga badiilka isagii oo ku wargelinaya barnaamijka dib-dhigay eryidda. (hadii uusan kani ahayn badiiladda PPS, maamulka waxa uu ubaahanyahay in uu xusuusiyo muhimdda la xidhiidhida ee najaxa ardayga ee dhamaysiga badiilka)
- Hadii dugsiga lagu wargeliyo in uu ardaygaasi si wanaagsan uu usoo dhamaystay badiilkii, warqad eryid oo la dirayaa ma jirto.

- Xaaladaha aysan dib-dhiqidda eryidu jiri doonin: hadii dugsiga lagu soo wargeliyo in aan ardayga laga ogolaan badiilka, ama uusan horumar wanaagsan ka samayn dhamaysashadda badiilka, xiligaa kadib waraaqaha eryidda waxaa loo dirayaa qoyska, galka anshaxa ardayga, xigaha Madaxa Dugsiyadda Degmadda, iyo Xafiiska Anshaxa Ardayga iyadii oo lagu wargelinayo in eryidii ay meel martay. Bilowga taariikhda eryidda waxa ay judhiiba raacaysaa maalintii ugu horaysay ee dhagaysiga iyadii oo lagu darayo waqti walba oo laga shaqeeyey badiiladda degmadda.

Hadii ay dhacdooyin kale oo anshaxumo ay dhacaan inta lagu jiro dib-dhiga eryidda, dhagaysiga anshaxumadda taagan lagu qaban doonaa dugsiga ardayga, kan oo soo rogi kara qawaaniinta marka lagu daro eryidda ku haboon dhacdooyinkii anshaxumo ee dambe, hadii ardayda la eryo sababta xadgudub uu ku talaabsaday intii lagu jiray xiligii dib-dhiga eryidda, eryidu waxa ay ka bilaabanaysaa dhagaysigii ugu dambeeyey.

Raadraac: [4.30.021-AD](#), 4.30.022-AD